

Codka seeriga

Markii uu dhaco shil weyn ama musiibo ay ku jirto khatar daran ee dhaawac ama burbur hanti, waxaa suuragal ah in looga digo dadweynaha Danishka nuuca khatartaan iyadoo loomaryo nadaamka diginiinta seeriga elektrooniga ee Qaranka Denmark.

Nadaamka Digniinta Seeriga.

Wakaalada Maareynta Xaaladaha Deg Dega ah ee Danmark Beredskabsstyrelsen waxey ka shaqaysiisaa joogteysiisana nidaamka digniinta seeriga.

Nadaamku wuxuu leeyahay 1,078 seeri tootal ahaan kaasi oo gaarayo 80 % dadweynaha Da-bishka. Koronto gaar ah oo aan go'eyn ayaa waxay u ogolaataa seerigu in uu shaqeeyo hadii xataa uu ay go'antahay korontadu.

Seeriga waxaa lagu rakibay guryaha ama baalay-aasha magaalada iyo magaalooyinka leh dad ka badan 1,000. Banaanka goobahaas, boolisku wuxuu isticmaali karaa seeriyaasha moobaylada laga diro.

Digniinaha booliska

Haddii uu dhaco shil weyn ama musiibo, boolisku wuxuu go'aansankaraa in uu isticmaalo Seeriga. Islamarkaana fariin dag daga ayaa waxaa baahinayo/soo deynay 110 labada TV ee qaranka DR iyo TV2.

Boolisku wuxuu bilaabayaa seeri yeerinta. Waxey awoodaan in ay ugu digaan dhamaan dadweynaha hal howlgal. Nadaamka digniinta Seeriga waxaa sida oo kale loo isticmaali karaa gobolada ama deeganda maxaligaa halkaasi oo boolisku ka bilaabayo siideynta seeriyada si halhal ah wuxuuna u digayaa goobo qaas ah.

Dadka dhib ku qabo maqalka ama si dacif ah wax u maqlo waxey iska diiwaan galinayaan nadaamka digniinta ee Beredskabsstyrelsen waxeyna helayaan digniino fariimo ah.

Laga soo bilaabo 1994 yeerin sanadle ah ee nadaamka digniinta seeriga ayaa dhacayey arbaco kaste ee ugu horeyso bisha May waqtiga duhuradii.

Dhamaan seeriyada waxaa la tijaabshaa habeen walba (Cod la'aan).

Maxey tahay in aad sameeyso?

Marka seerigu dhawaaqo Waa Inaad gudaha gasho Oo Aad dhegeysato DR ama TV2

Waxaa haboon in aad hubiso in dadka joogo dhamaan ay fahmeen seenyaalayaasha digniinta.

DR iyo TV2 waxey ku wargalinayaan dadweynaha xaalada, waxeyna u sheegayaan awaamiirta waxa aytahay in lasameeyo. Fariimahaani waxaa laga soo dirayaa ama ka imaanayaan booliska ama doowlada.

DR iyo TV2 waxey kuugu soo qaarayaan shaashada qoraal am sawiro laxariira maclu-umaadka bogga 150.



Nadaamka digniinta seeriga waxaa la isticmaalaa haddii ay jiraan shilal waaweyn ama musiibo.

Seenyaalaha

Seeriyaasha waxey soo saaraan seenyaale cod qaas say uga digaan xaalad khatar ah.

Seenyaaluhu waxuu ka koobanyahay cod kaasi oo u kaco si dhaqsa leh ka dibna u soo yaraado si heer heer ah. Seenyaalahaan waxaa la yeershaa afar mar guud ahaan, wuxuuna soconayaa 45 sekan.

Seenyaalaha khatarta waxaa loo sharaxa sidaan:



Nadaamka digniinta seeriga waxaa sida oo kale la isticmaalaa marka khatartii jiraty ay dhamaato. Nadaamku wuxuu soo saarayaa cod seenyaale ah si loo dhameeyo khatartii jirtay.

Seenyalaha codkaan waa mid cod dheer oo isku mid ah soconayo 45 sekan.

Seenyaaleynta codka, dhamaadka xaalada khatarta ah waxaa loo sharaxaa sidaan:

Markii seenyaalahaan laga dhawaajiyo, waxaad si badbaado leh u aadi kartaa banaanka mar kale.



Waxaad ka aqrisaa wax badan oo ku saabsan digniinta seeriga:
www.brs.dk/en/sirens